National Institute for Public Health
and the Environment
*Ministry of Health, Welfare and Sport*

# Baaritaanka maqaarka iyo Baaritaanka dhiiga

## *Cudurka qaaxada*

## Maxay tahay sababta baaritaanku muhiim u yahay?

Cudurka qaaxada (TB) waa cudur aad u daran, oo ay sababtay bakteeriyadu. Cudurka wuxuu kajiraa aduunka oo dhan. Xataa haddii aadan xanuunsanayn, wali waxaad qabi kartaa bakteeriyada qaaxada. Kani waxaa loo yaqaan caabuqa qaaxada. Daaweynta caabuqa TB waxay kaa ilaalin karaan inaad dib ka qaado cudurka qaaxada (TB) muddo kadib.

## Yaa baaritaanka laga qaadaa?

Warqadda kugu casumaysa inaad ka qaybgasho barnaamijka baadhista waxay sharxaysaa sababta adiga (ama ilmahaaga) lagu codsaday in la baadho.

Sababaha suurtagalka ah waxaa ka mid ah:
- Adiga (ama ubadkaaga) waxaad ka timi wadan ay ku badantahay TB.
- Adiga (ama ubadkaaga) ayaa udhawaaday qof qaba cudurka qaaxada ama qaaday bakteeriyada cudurka qaaxada.
- Adiga nidaamkaaga difaaca jirka wuu, liitaa. Sababo la xariira inay qabaan HIV ama qaataan daawooyinka daciifiya nidaamka difaaca jirka. Dadka horey u qabay bakteeriyada qaaxada ee daciifka ah ayaa halis saaid ah ugu jira inay qaadaan qaaxada (TB).
- Adiga oo u shaqeeya koox ka imaatay meel uu ku badan yahay cudurka qaaxada (TB).
- Adiga oo u socdaala dal uu ku badan yahay cudurka qaaxada (TB).

## Sidee loo baaraa caabuqa TB?

Waa lagu waydiin doonaa inaad buuxiso foom ay ku qoran yihiin su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga guud. Markaas kadib waxaa lagugu sameyn doonaa baaritaanka maqaarka iyo/ama baaritaanka dhiiga. Baaritaanadaan waxay muujin karaan in jirkaagu aqoonsan karo bakteeriyada qaaxada (TB) iyo inaad qaadi karto caabuqa. Haddii ay sidaas muujiyaan, waxaan markaas kadib kaa qaadi doonaa raajitada xabadka si aan u hubino inaad qabto iyo inkale qaaxada (TB).

Foomka su'aalaha wuxuu noosheegi doonaa inaad:
- qabto wax astaamo ah oo uu sababay qaaxada (TB);
- halis saaid ah ugu jirto qaadida cudurka qaaxada (TB). Arrintaan waa muhiim in aan awood ugu yeelano inaan si sax ah u qiimeyno natiijada baaritaanka.

Baaritaanka maqaarka wax dhib ah maleh. Sidoo kale waxaa loogu talagalay carruurta iyo dumarka uurka leh.

# Tuberculin skin test (THT, Baaritaanka maqaarka ee tuberculin)

**Baaritaanka illaa natiijada**

## 1 Baaritaanka maqaarka



Baaritaanka maqaarka waxaa kujira dheecaan yar oo lagu duraayo maqaarka gaar ahaan qaybta hore ee gacanta bidix. Waxaad si aayar-ayaar ah u arkaysaa meesha oo yeelatay kuus yar. Tani waa wax iska caadi ah. Kuusmuda waxay baabi'aysaa muddo dhowr daqiiqo kadib ah, mararka qaar xoogaa ayay qaadataa.

Kadib baaritaanka maqaarka, waxaad qabsan kartaa balan aad dib ugu laabanayso Adeega Caafimaadka Dadwaynaha ee Dawlada Hoose (GGD). Marka waxaanu eegi doonaa in jirkaagu ka falceliyo baaritaanka. Arrintaan waxay noqonaysaa labo illaa saddex maalmood kadib.

## 2 Sug baaritaanka

Waxay noqon doontaa labo illaa saddex maalmood kahor inta aan la qiimeyn falcelinta suurtagalka ah.
Waa muhiim inaadan seexan ama aadan xoqxoqin meesha lagaa duray. Sidoo kale waa inaadan meesha ku dhejin suuf.

## 3 Natiijada

Waxaad dib ugu laabanaysaa GGD waqtiga loogu talagalay natiijada. Kalkaaliyaha daryeelka caafimaadka wuxuu eegi doonaa in maqaarkaagu saameeyay falcelin xasaasiyad iyo inkale. Haddii aad falcelin xasaasiyad ka qaado baaritaanka maqaarka, markaas caadiyan waxaa la qaadi doonaa baaritaanka dhiiga.

Balanta GGD waa labo illaa saddex maalmood kadib. Markaas kadib, falcelin kasta oo xasaasiyad laguma sameyn karo qiimeyn baaritaankuna waa in dib loogu celiyo, sidaas oowgeed waa muhiim inaad imaato GGD waqtiga lagugula heshiiyay.

Haddii natiijada maqaarka ay sheegayso inaad qabto xanuunka, markaas waxaa lagugu sameyn doonaa raajitada xabadka. Arrintaan waxaa loogu talagalay in meesha looga saaro cudurka qaaxada (TB).

## Maxay natiijadu noqon kartaa?

Natiijadu waxay noqon kartaa labadaan qaab midkood:

**Baaritaanka maqaarka (THT) waxay sheegaysaa inuu cudurku jiro**
Majirin wax falcelin xasaasiyad ah oo la arkay. Waqti xaadirkaan, majiraan wax caddeyn ah oo muujinaysa caabuqa qaaxada (TB).

**Baaritaanka maqaarka (THT) waxay sheegaysaa inuusan jirin cudurku**
Waxaa la arkay falcelin xasaasiyad. Tani waxay la micno tahay inaad qabi karto bakteeriyada qaaxada (TB).

**Haddii natiijada maqaarku sheegto inaad qabto cudurka, arrintaan waxay la micno noqon kartaa afar arrimood:**
1. Waxaad qabtaa bakteeriyada qaaxada (TB) laakiin (wali) lama aadan xanuunsan cudurka.
2. Waxaad qabtaa qaaxada (TB).
3. Waxaad qabtaa bakteeriyo lamid bakteeriyada cudurka qaaxada (TB).
4. Waxaad qaadatay talaalka kahortaga qaaxada (talaalka BCG).

Baaritaan dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo ogaado sababta saxda ah. Baaritaanka dhiiga waxa uu natusi karaa inaad si dhab ah u qabto bakteeriyada. Tani waa sababta caadiyan loo sameeyo baaritaanka dhiiga haddii natiijada baaritaanka maqaarka noqoto mid togan. Carruurta jira sano ama kasii yar iyo dadka nidaamkooda difaaca jirka uu laciifay mar kasta uma baahnaan doonaan inay sameeyaan baaritaanka dhiiga.
Dakhtarka ayaa kaala hadli doona wax ay tahay inaad sameyso.

## Baaritaanka dhiiga (IGRA)

**Baaritaanka illaa natiijada**

### 1 Baaritaanka dhiiga

Marka la sameynaayo baaritaanka cudurka qaaxada waxaa qofka laga qaadaa muunad dhiig ah.

A. Healthcare assistant (HCA, Kaaliyaha daryeelka caafimaadka) wuxuu gacantaada ku xirayaa xarig balaastig ah.

B. Shaqaaluhu waxay hadda kaa qaadi doonaan dhowr tuubo oo dhiig ah.

C. Markaas kadib HCA wuxuu maqaarka ku xirayaa suuff ama suufka lagu dhejiyo meelaha dhaawacyada ah.

### 2 Qiimeynta sheybaarka

Dhiigaaga waxaa loo diri doonaa sheybaarka.

Sheybaarku wuxuu dhiiga ka eegi doonaa caabuqa TB-da ee suurtagalka ah.



## 3 Natiijada

Caadiyan waxaad natiijada heli doontaa labo illaa saddex asbuuc kadib marka lagaa qaado baaritaanka dhiiga.



## Maxay natiijadu noqon kartaa?

Natiijadu waxay noqon kartaa labadaan qaab midkood:

**Baaritaanka dhiiga (IBRA) wuxuu sheegayaa inuusan jirin cudurku**
Lama helin wax antiboodh ah oo la xariira bakteeriyada TB-da. Tani waxay la micno tahay inaadan qabin bakteeriyada qaaxada (TB).

**Baaritaanka dhiiga (IBRA) wuxuu sheegayaa inaad qabto cudurka**
Antiboodhig oo la xariira bakteeriyada TB-da ayaa la helay.

**Haddii natiijada baaritaanka dhiiga uu sheego inaad qabto cudurka, arrintaan waxay la micno noqon kartaa labo arrimood:**

- Waxaad qabtaa bakteeriyada qaaxada (TB) laakiin (wali) lama aadan xanuunsan cudurka;
- Waxaad qabi (kartaa) qaaxada (TB).

## Maxaa dhacaaya haddii natiijada baaritaanka/qiimeynta ay sheegto inaad qabto cudurka?

Waxaa loo baahan karaa baaritaan dheeraad ah. Dakhtarka ayaa kaala hadli doona wax ay tahay inaad sameyso.

## Maxaan ku sameynaynaa xogtaada?

GGD waxay xogtaada gaarka ah ee ay haysto kuna jira faylka caafimaadka u kaydisaa qaab waafaqsan sharciyada qaanuunka degsan.

## Ma qabtaa wax su'aalo, tallooyin, walaacyo ama bogaadin ku saabsan baaritaanka?

- Fadlan la xariir waaxda kahortaga cudurka qaaxada ee GGD ee deegaankaaga. Waxaad xogta xiriirka ka heli kartaa www.ggd.nl iyo kaarka casuumaada talaalka. GGDs waxay leedahay hanaan lasoo gudbiyo cabashooyinka.
- Waxaad xog dheeraad ah oo ku saabsan cudurka qaaxada ka heli kartaa www.rivm.nl/tuberculose.

This information is available in English at:
Xogtaan oo Soomaali ah waxaa laga heli karaa:
Te informacje można znaleźć w języku polskim na stronie:
ብቋንቋ ትግርኛ ዝተተርጕመ መልክዕ ናይ'ዚ ሓበሬታ፡ ኣብ'ዚ ዝስዕብ ገጽ ክርከብ ይከኣል፡-

هذه المعلومات متاحة باللغة العربية في هذا الموضع:

این معلومات به زبان دری در اینجا قابل دسترس است:

www.rivm.nl/en/tuberculosis/information-materials

*Photo on the front: KNCV Tuberculosis Foundation*

Published by:

**National Institute for Public Health and the Environment, RIVM**
PO Box 1 | 3720 BA Bilthoven
The Netherlands
www.rivm.nl/en

September 2022

Committed to *health and sustainability*

014340-SOMALISCH